

ADEEGGA TAAGEERADA MAXKAMADDA DADKA MADAXA KA BUKA

Waxa heli kara:

- Dadka 16 jirka ah iyo ka weyn ee
- Dhibaato maskaxda ka qaba ee
- Lagu soo eedeeyey dembi fudud

Magaalada Toronto

- Haweenka xabsiga ku jira, waxa kiiskooda dhegeysata maxkamadda ku taal College Park. Haweenka aan xabsiga ku jirin, waxa kiiskooda lagu dhegeystaa degmada ay ku galeen dambiga lagu soo eedeeyey.
- Kiisaska ragga, waxa lagu dhegeystaa maxkamadaha ku yaal degmooyinka ay ku galeen dambiga lagu soo eedeeyey.
- Qiyaasidda in eedaysanaha la maxkamadayn karo ee Old City Hall iyo College park, waxay ka dhacdaa Maxkamadda u gaarka ah dadka madaxa ka buka, qolka 102 ee Old City Hall.

Soo-gudbin

Qof kasta ayaa soo gudbin kara oo ay ku jiraan shakhsiyadka la eedeeyey, qoyska iyo saaxiibada, Booliska, xeer-ilaaliyaha, qareenka, xaakinka, adeeg-bixiyeyaasha, hay'adaha beesha iwm.

Adeegyadan waxa maal geliya Wasaaradda Caafimaadka, waxana la hirgeliyaa iyadoollala kaashanayo. Wasaaradda Xeer -ilaaliyaha Guud.

Wax kharash ah uguma fadhido adeegsadaha.

CRCT waa hay'ad beeled aan macaash samayn, asxaan-fal ah oo u adeegeysey dadka madaxa laga hayo ee ku nool aaga Toronto in ka badan 30 sano.

Waxan caawinnaa dadka waayeelka ah (adults) ee isticmaala habka caafimaadka maskaxda. CRCT waxa maal-geliya Wasaaradda Caafimaadka iyo Deryeelka Waqtiga Dheer ee Ontarityo. Waxa kale oo kaba maal-gelinteeda: United Way of Toronto, Wasaaradda Hiddaha ee Kanada, Kilaabka Rotaryga ee Toronto, EJLB Foundation, Ontario Trillium Foundation, City of Toronto – access and equity.

Lambarka Diiwaan-gelinta Asxaan-falka

#118871128 RR0001

Iyadoo laga mahad-naqayo tabaruca, waa la aqbalayaa.

Warar dheeraad ah waxad ka heli kartaa shabakaddayada Internetka ee ah www.crct.org.



Community
Resource
Connections
of Toronto



Community
Resource
Connections
of Toronto

**TAAGEERIDDA MAXKAMADDA
DADKA MADAXA KA BUKA**

TAAGEERIDDA MAXKAMADDA DADKA MADAXA KA BUKA

Ujeedada Barnaamijka Taageeridda Maxkamadda Dadka Ka Buka Madaxa, waa taageeridda dadka buka ee lagu eedeeyey dembiyada fudud, si ay u helaan una isticmaalaan adeegyo loogu talo-galay dadkaas.

Barnaamijka taageeridda maxkamadda dadka ka buka maskaxda, waxu aqoonsanyahay in dadka qaar lagu eedeeyo dembiyadu, marka la marinayo maxkamadda, ay ku wanaagsan yahiiin in la mariyo habka maxkamadda dadka madaxa ka buka, halka laga marin lahaa maxkamadda dembiyada ee caadiga ah. (CJS), hadday doonayaan.

Qof ka shaqeyda Maxkamadda daka ka buka maskaxda, ayaa la kulma qofka ka buka madaxa ee galay dembi fudu, si uu u qiimeeyo xalaadiisa iyo baahidiisa. Qiimeynta waxa ka mid ah heerka xanuunka madaxa ee u ku sugan yahey qofku, xalaadiisa nolosheed ee uu hadda marayo, gargaarka uu haysto iyo xidhiidhka uu la leeyahey dhakhtarada ku takhasusay cudurrada madaxa iyo adeegyada kale.

Qiimeynta qofka buka ee shaqaalaha maxkamadda caafimaadka madaxa, waxa daba socda la shaqaynta qofka, si loogu sameeyo qorshe loogu wareejiyo Maxkamada Dadka Ka Buka Madaxa uguna soo jeediyaan adeegyada ku habboon. Waxa qiimayntan ku jiri kara, qiyaasidda caafimaadka maskaxda qofka, daweyn, u diyaarin waxyaalaha lagama maarmaanka ah ee qofku u baahanyahey, sida :guriga, cuntada, dharka iyo helitaanka taageerada ururrada beesha ee wakhtiga dheer.

Kadib marka ay isku raacaan qorshahan qofka buka iyo shaqaalaha Maxkamadda Cudurrada Madaxu, waxa loo diraa xeer-ilaaliyaha guud ee gobolka, si uu u soo ogolaado.

Shaqaalaha Maxkamadda Cudurada Madaxu, waxay caawin doonaan qofka, si uu u helo adeegyada una isticmaalo kuwa laysla gartay, waxa kale oo ay siindoonaan taageero guud iyo gargaar xilligiisu gaaban yahey.

Cadaalad iyo Sinaan:

CRCT, waxay ballan qaadeysaa in ay la shaqeyso dadka caqabado kala kulma adeegyada, gaar ahaan kuwa ka dhasha guryo la'aanta, isku dhaca sharciga, sinjiga, dhaqanka, dhalashada, nooca galmada iyo af-garashada.

ADEEGYADA LA BIXIYO:

1. Dhaqan celinta Cudurada Maskaxda.

Adeegan waxaa heli kara dadka ay hayso:

- Dhibaato caafimaad oo xoogan, ahna dhinaca maskaxda ama cudur maskaxeed caadi ah.
 - Qofka lagu eedeeyey inu galay dembi fudud;
 - Qofka ogolaaday barnaamijka in loo u duwo maxkamadda dadka madaxa ka buka.
 - Qofka uu u soo ogolaaday xerilaalyaha guud ee gobolku in loo duwo maxkamadda dadka madaxa ka buka.
2. ku xidhidda dadka adeegyada ay u baahan yihiin xilliga dhaw iyo ka dheerba.
3. taagaaridda iyo wacyi-gelinta qoyska iyo ciddii kale ee la gaadhi karo.
4. wacyi-gelinta xagga macmiisha, cudurrada maskaxda, adeegyada cudurrada madaxa iyo habka caafimaadka maskaxda.

Waxay Maxkamadda Dadka Madaxa ka Bukaa ballan qaadeysaa, inay bixiso adeegyo la-talin ah oo badan. La talintaas oo dib ugu noqonaysa adeegyada lagu bixiyo mashruucan khaaska ah oo aan la xidhiidhin qorshaha u duwidda maxkamadda dadka buka iyo adeega isku dubbarridka arrimaha toona. Waxana ka mid ah codsi adeeg marle ah”, sida ka jawaabidda su’aalaha ku saabsan shaqada maxkamadda ama warbixinta goobaha adeegyada beesha ee uu qofku taageero ka heli karo.

Tusaale ahaan, Talo-bixintu waxay talo kaa siisiin kartaa in la eego sababta uu xeer-illaaliye, qareen ama horjoogaha Shaqo (duty counsel), xaakin ama shaqaale kale oo maxkamadda tirsan, xubnaha ka tirsan qoyska eedeysaneha ama adeeg-bixiye kuugu diidey in lagu duwo habka maxkamadda dadka madaxa ka buka.

XIL-QARINTA:

Dhamaan shaqaalaha, ardayda iyo tabaruucayaasha Xidhiidhinta Adeegyada Beesha Toronto (CRCT), waxay ku khasban yahiin inay saxeexaan dhaarta xil-qarinta. Si gaar ah ayaannu u dhawraynaa warbixinta kuu gaarka ah, cidna u gudbinmaynno adoon noo ogolaan, haddaannu sharcigu nagu khasbin. Si ad wax uga

ogaato siyaasadayadda ku xil-qarinta, la xidhiidh sarkaalka mashruuca xil-qarinta (416) 482-4103.

ISKU XIDHKA TAAGEERADA MAXKAMADDA:

Isku xidhka Taageerada Maxkamadda ee Toronto, waxu ka kooban yahay maaraynta iyo shaqaalaha Barnaamijka Taageeridda Maxkamadda ee magaalada Toronto. Kulanada waxa si joogto ah loo qabtaa, si loo wadaago warbixinta, soo saaridda nidaam isku mid ah, ururinta warbixinta guud, tilmaamidda xaaladaha iyo dejinta tab lagu hagaajiyo adeegyada.

Maxkamadaha Toronto iyo Adeegyada ay Bixiyaan

College Park – Ontario Court of Justice

CRCT (Shaqaalaha Taageera Maxkamadda) – Room 263

Tel: (416) 598-8103

CRCT (Shaqaalaha Taageera Maxkamadda) – Room 265

Tel: (416) 598-8108 | Fax: 598-3495

Metro West – Ontario Court of Justice

CMHA – West Toronto (Shaqaalaha Taageera Maxkamadda)

Tel: (416) 314-3408 or (416) 314-3384 | Fax: (416) 314-5765

Metro North Ontario Court of Justice

COTA (Shaqaalaha Taageera Maxkamadda)

Tel: (416) 667-0933 | Fax: (416) 667-1084

Old City Hall Ontario Court Of Justice iyo

Maxakabada Cudurada Maskaxda

CRCT (Shaqaalaha Maxakabada) – Room 20

Tel: (416) 364-8394 | Fax: (416) 364-3671

Metro East - Ontario Court of Justice

CMHA – East Toronto (Shaqaalaha Taageera Maxkamadda)

Tel: (416) 285-4177 | Fax: (416) 285-1663